



Mudane Diijon DaCosta, Sr., *Guddoonka Guddiga*
 Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*
 Marwo Anna Hill
 Marwo Whitney McGinniss
 Marwo Allyson Gevertz
 Marwo Vickie B. Turner
 Dhaqtar Joyce Morley

Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

WIXII FASAXID DEGDEG AH

Agoosto 16, 2024

Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110
 Carla Parker 404-734-1717

DCSD waxay ku balaarisaa Nidaamyada Baarista Hubka ee Xarumaha Ciyaaraha iyo Dugsiyo Badan

Dhammaan Ciyaaraha Kubada Cagta Guriga DCSD inay Isticmaalaan Tejnoolijiyada Bilaabaneysa Caawa

(STONE MOUNTAIN, GA)— Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) waxay sare u qaadaan badqabka sannad dugsiyeedka 2024-25 iyadoo la balaarinayo nidaamka hub baarista *Evolv Express*® oo meelo badan oo goobahooda iyo xarumahooda.

Tejnoolijiyada hormarsan, oo taasoo horay loo cadeeyey inay wax ku ool u tahay 41 dugsiyo dhexe iyo sare oo Degmadoo dhan ah, ayaa hadda laga howlgelinayaa shan garoon oo kubada cagta ah, lix barnaamijyada dheeraad ah oo dugsiya sare ah iyo xarumaha, iyo xarunta dhexe ee DCSD, Dhismaha Waxbarashada iyo Maamulka Robert R ee Stone Mountain.

Laga bilaabo xilli ciyaareedkaan, booqdayaasha ka qeybgalaya ciyaarahaan kubada cagta iyo kubada koleyga guriga ee DCSD ayaa la kulmayo badqab la xoojiyay iyo ku haboonaanta ay bixiyaan nidaamka Evolv. Si weyn ayaa looga isticmaalaa fagaarayaasha ciyaaraha xirfadleyda, goobaha riwaayadaha, dugsiyada, iyo xarumaha kale ee dadweynaha, tejnoolijiyadaan casriga ah waxay isticmaalaan tejnoolijiyada sensar xoogan, sirtoonka macmal ah, iyo falanqeynada goob dhameystiran si loo hubiyo baarista halisaha saxda ah oo degdeg ah.

“Halka shey oo ay dadka badanaa ku jecelyihiin nidaamka baarista hubka EVOLV ayaa ah inay u ogolaato shaqsiyaadka inay maraan iyagoon joogsan, jeebabkooda ama boorsoodyinkooda faarujin, ama ay sugaan safaf dhaadheer,” waxaa yiri Madaxa Booliska DCSD, Tracey Whaley. “Oo way noo suurtoogleysaa inaan midaan sameyno sababtoo ah waxaan leenahay shaqaalaha badqabka oo si gaar ah u tababaran oo kormeero saldhigyada waqtiga dhabta oo waxay si dhaqso ah u aqoonsan karaan oo wax uga qaban karaan haliso walba ama walaacyo walboo imaan karo.”

Chief Whaley ayaa sidoo kale xausiyay dhammaan dhacdooyinka ciyaaraha DCSD in Degmada ay sii wadeyso inay dhaqan geliyaan [Xeerka Boorsada Banaan](#).

Balaarinta *Evolv Express*® waxay qeyb ka tahay balanqaadka joogtada ah ee DCSD ee lagu joogteynayo ujeedkooda koowaad: Abuurista iyo joogteynta jawiyo ammaan u ah dhammaan ardayda, shaqaalaha, qoysaska, iyo booqdayaasha.

XXX